CABEEB

Afka Ingriisiga waxaan lagu yiraahdaa 'Foot and Mouth Disease' ama cudurka Afka iyo Qoobka

Cudurka

Keenaha Cudurka

Cudurka ***Cabeebka*** waxaa keena oo sabab u ah nafley yar-yar oo aan indhuhu arki karin qalabka wax weyneeya la'aantiis oo ah kuwa loo yaqaan Fiiruska.

Wuxuu u kala baxaa cudur keenuhu 7 nooc oo kala ah: O, A, C, SAT 1, SAT 2, SAT 3 iyo Asia 1.

Noocyada kala duwan ee cudurkan Cabeebka qaarba waxay u yihiin gaar oo ka dhacaan qaaraddaha qaarkood, waana sidatan:

Nooca keenaha	Qaaradda
A, O, C	Afrika, Asia, Urub, Koonfur Amerika
SAT 1	Afrika iyo Asia
SAT 2, SAT3	Afrika
Asia 1	Asia oo keliya

Gobolka Geeska Afrika inta Soomaalidu degto noocyada laga helay waxay yihiin; **O**, **A** iyo **SAT 2**

Baahsanaanta Cudurka

Adduun weynaha cudurka Cabeebka waxaa ka nabad galay wadamo tiro yar oo keliya kuwaas oo aan weli lagu arag waxaana ka mid ah; New Zealand, Jabaan iyo wadamada Badhtamaha Qaaradda Koonfurta Ameerika qaarkood. Waxaa cudurkan lagu guuleystay in laga cidhibtiro wadamada ay ka mid yihiin, Australia, Canada (Kanada) iyo Maraykanka.

Wadamada Qaaradda Urub (Europe) badidooda iyana waa laga cidhibtiray, inkastoo dhowaan dhowr jeer Cabeeb ka dilaacay dalka Boqortooyada Ingriiska (U.K.)

Xoolaha uu ku Dhaco

Cudurka Cabeebku wuxuu ku dhacaa oo u nugul xoolaha nooca loo yaqaan qoobleyda ama kuwa leh labada raaf oo ay ugu horeeyaan lo'da, doofaarka iyo adhigu. Wuxuu ku dhaca ugaadh ama cidood badan oo ay ka mid yihiin goodirka iyo biciidku. Lo'gisida ayaa loo malaynayaa in ay nooc ka mid ah cudur keenaha Cabeebka kaydiso ama sidi karto muddo iyada oo aan wax astaamaha cudurka ah soo bixin ama muujin.

Isugudbinta Cudurka

Cudurka **Cabeebku** wuxuu ka mid yahay cudurada xoolaha kuwa sida ugu dhakhsaha ama deg-degta badan ugu faafa ama ugu fida xoolaha. Cabeebka waxay xooluhu isugu gudbin karaan si toos ah iyo si dadban labadaba: Isugudbinta tooska ahi waxay dhacdaa markii xoolo jirran iyo kuwa fayow ama caafimaad qabaa isku soo dhowaadaan sida xerda dhexdeeda, darka ama kaalinta biyaha ay ka wada cabayaan, suuqyada xoolaha iwm.

Isugudbinta aan tooska ahayn waxay dhacdaa markii cudur keenaha loo kala qaado neef buka iyo kan fayow. Waxaa la xaqiijiyey in Fiiruska keena Cabeebka ay dabayshu qaadi karto masaafo ila 250 kilomitir ah, habkaasna cudurku ku fidi karo.

Dadka xoolaha xannaaneeya iyo dhakhaatiirta daaweysa labaduba way gudbin karaan cudurka haddii aany taxaderin. Wayluhu waxay ka qaadi karaan caanaha neefka buka.

Waxaa la xaqiijiyey in neefafka ka soo dooga ama ka bogsooda Cabeebka qaarkood ay intii muddo ah sidaan Fiiruska cudurka keena kaas oo laga helo dalqada neefka.

Astaamaha/ Calaamadaha Cudurka

Astaamaha lagu garto Cudurka Cabeebka markii uu ku dhaco lo'da waxaa ka mid ah:

- Gangan ku jabsan neefka (ama cadar)
- Daaq yaraysi
- Irmaanka oo caana yareeya
- Qandho ama xumad
- Finnan ka soo baxa afka; (carabka, ciridka iyo bishmaha), sanka gudihiisa iyo inta labada dul u dhexeysa, agagaarka qanjaafulaha ama qoobabka iyo inta labada qoob u dhexaysa, caandha iyo naasaha
- Neefka oo daaqi waaya
- Dhareer badan
- Finnaka oo markii ay dilaacaan ay nabaro ama boogo samaysmaan marka dambena nabaradaasi suulaan ama caabuqaan
- Nabarada lugaha oo keena dhutin
- Irmaanka oo candha xanuun ku dhaco nabarada dartood



Nabaro ka muuqda carabka neef Cabeeb qaba

Geeska Afrika Cabeebku lo'da waaweyn ma dilo, lakiin waylaha yaryar ayuu badanaa dilaa iyaga oo aan wax astaamo ah oo muuqda lahayn

Si loo xaqiijiyo cudurka waxaa loo baahanyahay in neefka buka laga qaado dheecaanka finnanka ama nabarada samaysmay oo shaybaar la geeyo.

Markii neef ka bogsoodo Cabeeb muddo kooban ayuu u yeelan karaa cudurkan adkaysi, laakiin noocii hore ugu dhacay mid aan ahayni isla markiiba wuu soo ridi karaa. Ilmaha hooyadii cudurku hore ugu dhacay oo ka nuuga walaxa cudurka ilaaliya waxay ka reebi karaan cudurka ila 5 bilood.

Neefkii uu ku dhacay Cabeeb oo ka bogsoodey waxaa lagu gartaa calaamado u gaar ah kuwaas oo ah:

Wuxuu tuurta ku yeeshaa dhogor ama timo dhaadheer oo loo yaqaan "***Gas***" ama "***Jeema***", caano iyo cad fiican ma yeesho, uma adkaysto qoraxda, hadhka ayuu ku cararaa waana xiiqaa ama neef tuura markuu socod galo.

Neef Cabeeb qaba oodhareer ka da'ayo

Xakamaynta iyo Dabargoynta

Wadamada hore looga dabar gooyey Cabeebka markii xoolaha lagu arko waa la laayaa, dabeedna la gubaa xoolihii uu ku dhacay iyo inta ku sugan agagaarkooda oo dhan. Wadamada Cabeebka guriga u ah ee uu sida joogtada ah uga dilaaco sida kuwa Soomaalidu degto waxaa lagu xakamayn karaa talaal. Talaalka laga sameeyey hal nooc ama dhowr nooc oo cudurkeenaha ah wuxuu neefka cudurka noocaasi keeno ka ilaalin karaa muddo 3-4 bilood ah. Haddii mar kale lagu celiyana muddo hal sanno ah.

Arrimaha laga rabo xoolo-dhaqatada si cudurkan loo xakameeyo fidistiisa waxaa ka mid ah:

- Xoolaha buka iyo kuwa fayow oo la kala soocoo ama la kala saaro
- Dhakhaatiirta xoolaha, maamulka deegaanka iyo Wasaaradda Xoolaha oo si deg-deg ah loo wargeliyo.
- Dhoofka xoolaha oo la hakiyo
- Lo'da oo la talaalo

<u>Cabeebku ma leh daawo u gaar ah laakiin neefka nabarada finnanka dilaacay keeneen ee suulay ama caabuqay ayaa lagu daaweeyaa Antibiotic</u>

Wuxuu neefka buka u baahanyahay xannaano kaalmo ah.

Neef Cabeeb ka bogsoodey oo ay ka muuqdaan timihii dheeraa ee tuurta (Gas/ Jeema)

Dhibaatada Dhaqaale

Cudurkan Cabeebku wuxuu dhibaato weyn u keeni karaa dhaqaalaha gobolka uu ka dhaco oo dhan. Dhibaatooyinka dhaqaale ee cudurkani keeno waxay ka imaan karaan; manaafacaadka xoolaha sida cadka iyo caanaha oo aad u yaraada iyo rimayda oo dhicisa. Cudurkani wuxuu aad u wax yeeleeyaa ganacsiga caalimiga ah ee xoolaha wuxuuna ka mid yahay cudurada sida aadka ah looga ilaaliyo suuqyada caalamka ee ganacsiga xoolaha nool iyo oonta xoolahaba.